Somali

Macluumaad loogu talogalay macaamiisha korontada, gaaska iyo biyaha

Haddii ay ku hayso wax dhibaato ah
Marka hore la xiriir shirkaddaada korontada, gaaska iyo biyaha una sharax dhibaatadaada. Haddii aad u baahto turjumaan, u sheeg shirkadda. Ama waxaad weydiisan kartaa saaxiib ama xubin qoyska ah inay adiga kuula hadasho shirkadda.

Haddii aad taleefan u dirto shirkadda diiwaanka ku qoro qofka aad la hadashay, iyo sidoo kale taariikhda iyo waqtiga. Hayso wixii waraaqo ama dokumanti ah oo aad ka hesho shirkadda.

Haddii aysan shaqaalaha xarunta wicitaanku ku caawin, weydiiso inaad la hadasho maareeyaha.

Haddii aan dhibaatadii la xallin, taleefan u dir EWON (Energy & Water Ombudsman NSW) wicitaanka lacag la'aanta ah ee 1800 246 545.

Wax ku saabsan EWON
Ombudismaanka NSW ee Tamarta iyo Biyaha (EWON) wuxuu caawiyaa dadka ku nool New South Wales kuwaas oo ay dhibaatooyin ka haystaan xagga bixiyeyaashooda korontada iyo gaaska. Waxaan kaloo ka caawin karnaa qaar ka mid ah cabashooyinka biyaha.

Adeegga EWON waa lacag la'aan, caaddaallad ah oo madax-bannaan.

Waxaan ka caawinnaa dhibaatooyinka ay ka midka yihiin:

- biilasha sarreeya
- daymaha
- jaridda korontada, gaaska ama biyaha
- tayada rukunka
- codsiyada magdhowga
- furitaanka ama xiritaanka akoonnada
- heshiisyada korantada iyo gaaska
- ku iibinta heshiisyada ee taleefanka ama guri guriga
- adeegga macaamiisha ee liita

EWON waxay diyaarisaa in qof jago sare ka haya shirkadda inuu kaala soo xiriiro dhibaatooyinkaaga ama waxaan anagu baari karnaa cabashadaada.

Haddii ay ku hayaan dhibaatooyinka bixinta biilashaada
EWON waxay kuu heli kartaa waqti badan oo aad ku bixiso biilkaaga ama waxay kaa caawin kartaa qorshe lacag-bixineed oo aad shirkadda la yeelato.

Waxaan ku siin karnaa macluumaad ku saabsan caawimaadda lacageed iyo kabitaannada dowladda.

Sida loola xiriiro EWON

Wicitaanka lacag la'aanta	1800 246 545 Isniinta-Jumcaha, 9am-5pm Haddii aad ka soo wacayso taleefanka moobaylka, noo sheeg markaasna dib ayaan kaa soo wacaynaa.
Fax Lacag la'aanta	1800 812 291
Booto lacag la'aanta	Reply Paid K1343, Haymarket NSW 1239
Email	omb@ewon.com.au
Website	www.ewon.com.au

Adeegga turjumaanka
Haddii aad u baahan tahay turjumaan kala xiriir Translation and Interpreting Service (TIS) taleefanka 131 450 weydii inaad ka wacdo EWON 1800 246 545.

Somali

Waxyaalaha ay tahay inaad ogaato

Furitaanka iyo xiritaanka akoonnada
Waxaa muhiim ah inaad furato akoon sida ugu dhakhsaha badan markii aad u soo guurto guriga, sidaas darteed waxaad bixinaysaa oo keliya korantadii iyo gaaskii ama biyahii aad isticmaashay. Sidaasna waxaad ku samayn kartaa taleefanka.

Milkiilaha gurigaaga ama wakiilka guriga ayaa kuu sheegi kara cidda rukunka korantada, gaaska ama biyaha bixisa.

Dhigaallada ammaanka
Shirkaddu waxay ku weydiin kartaa inaad bixiso dhigaalka ammaanka. Kaysaska qaarkood sidaan waa layska dayn karaa, sidaas darteed weydii shirkadda arrintaas.

Bixinta biilasha
Waxaad helaysaa biil 3dii biloodba. Haddii aadan helin, u sheeg shirkaddaada arrintaas.

Badiba shirkadaha, waxaad biilasha ku bixin kartaa xafiiska boostada, taleefanka adoo isticmaalaya kareedhitka kaarkaaga, intarneedka, ama Centrepay.

Centrepay
Haddii aad qaadato lacagta howlgabka dowladda, waxaad ku bixin kartaa biilashaada adoo isticmaalaya Centrepay. Weydii shirkaddaada ama Centrelink arrintaas.

Kabitaanka lacagta howlgabka
U sheeg shirkadda haddii aad qaadato lacagta howlgabka dowladda (lacag-bixinta Centrelink), waxaad xaq u yeelan kartaa wax-ka-dhimis.

Qorsheyaasha Lacag-bixinta
Shirkado badan ayaa bixiya qorsheyaasha lacag-bixinta si loo caawiyo dadka ay hayaan dhibaatooyinka dhaqaaleed. Weydii shirkaddaada arrintaas.

Biilasha aan la bixin
Haddii ay jiraan biilal aan la bixin isla markaasna uu ururiyaha daymuhu (debt collector) (mararka qaarkkodna loo yaqaan “mercantile agent”) uu kula soo xiriiro waxaad wacdaa Taleefoonka Credit & Debt Hotline oo ah 1800 808 488 wixii talooyin lacag la’aan ah ama waxaad wacdaa EWON.

Caawimaad lacageed
Foojarrada EAPA (Energy Accounts Payment Assistance – Caawimaadda Bixinta Akoonnada Tamarta) waxay kaa caawin karaan bixinta biilasha korontada iyo gaaska.

Foojarrada PAS (Payment Assistance Scheme – Qorshaha Caawimaadda Lacag-bixinta)) waxay kaa caawin karaan bixinta biilasha biyaha.

Waxaad u tegi kartaa haya’daha daryeelka bulshada (sida St Vincent de Paul ama Salvation Army) si aad u codsato foojarrada EAPA ama PAS. Waxaad taleefan u diri kartaa EWON haddii aadan hubin haya’ddii haysa foojarrada.

Haya’dda bulshada ayaa ballan kuu samaynaysa si loo eego haddii aad u xaq leedahay foojarrada. Keliya qofka haysta akoonka ayaa codsan kara foojarrada waxayna u baahan yihiin inaad biilka keento si aad u tusto inta lagugu leeyahay.

Maxaa dhacaya haddii aadan bixin biilashaada?
Haddii haddii aadan bixin biilashaada ama aad gefto bixintii, rukunkaagii waa la jari karaa ama waa la xayiri karaa. Haddii ay sidaas dhacdo waxaad la kulmi kartaa lacag dheeraad ah oo lagugu yeesho, sidaas darteed la xiriir shirkaddaada sida ugu dhakhsaha badan haddii ay dhibaato kaa haysato bixinta biilashaada.

Lagaama jari karo haddii aad ballan la leedahay haya’dda bulshada wixii ku saabsan foojarrada
EAPA.

Kharashyada biyaha ee kireysteyaasha
Haddii aad u guurayso guriga Department of Housing, caravan park ama unid gaar ah oo leh mitirka biyaha, waxaa laga yaabaa inaad bixiso biyaha aad isticmaasho. Weydii milkiilaha gurigaaga haddii at tahay inaad bixiso biyaha.

Heshiisyada korontada iyo gaaska
Shirkado badan ayaa bixiya wax-ka-dhimisyo haddii aad saxiixdo heshiis saddex sano ah. Waa inaad la socotaa badiba heshiisyadan:

- shirkaddu waxay ku saari kartaa ujrad wixii ka noqoshada heshiiska oo waqti hore ah
- sida badan uma wareejin kartid heshiiska guriga cusub haddii aad guurto.

Waxba ha saxiixin adoon akhriyin heshiiska si taxadar ah, ama weydiiso cid kuu akhrisa. Haddii aad u baahato caawimaad dheeraad ah ee heshiiska ah, Waxaad taleefan ku wacdaa EWON.